DAWLADA DEEGAANKA SOOMAALIDA
WAKAALADA DHISIDA IYO KOBCINTA
ISKAASHATOOYINKA

SHAHAADADA KUMEELGAADHKA AH

Iyadoo Laraacayo Bayaanka Lagu Aas-Aasay Iskaashatooyinka Ee Tirsigiisu Yahay 985/09 Ayaa Manta Oo Ay Taariikhdu Tahay 24-11-2017 Uu Xafiiska Iskaashatooyinku Siiyay Shahaadadan Kumeel-Gaadh Ah Iskaashatada TIGER Ee Malabka Gobolka Fafan Degmada Jijiga Qabalee 08

MagacaSargaalkaDiyaariyey: Nur Abdiqadir Salah
ፍቃዱን ያዘጋጀው ባለሙያ ስም: ኑር አብዲቃዲር ሳላህ
Cooperative Establishment & Promotion Directorate Director
የኅብረት ሥራ ማህበራት ማደራጀት፣ ማሰልጠኛ ዳይሬክቶሬት ዳይሬክተር

Saxeexa:

Ogaysiis: - Shahaadadani Waxay Noqonaysaa Mid Sharci Ah Mudo Hal (1) Sano Ah Oo Kaliya Laga Bilaabo Taariikhda Labixiyay::

በኢትዮጵያ ፌደራላዊ ዲሞክራሲያዊ ሪፐብሊክ
የሶማሌ ክልላዊ መንግስት የኅብረት ሥራ ማ/ማ/ማ/ ኤጀንሲ

ጊዜያዊ የምስክር ወረቀት

የኅብረት ሥራ ማህበራትን ለማቋቋም በወጣው አዋጅ ቁጥር 985/09 ዓ.ም መሠረት በዛሬው ቀን 24/11/2017 የ ታጋር የማር ኅብረት ስራ ማህበር በጊዜያዊነት ታውቆ የሶማሌ ክልላዊ መንግስት የኅብረት ሥራ ማ/ማ/ማ ኤጀንሲ በምዝገባ ቁጥር ACG/17224/17 የተመዘገበ መሆኑን የሚያረጋግጥ ይህ ጊዜያዊ የምስክር ወረቀት ተሰጥቷል::

ዞን ፋፋን ወረዳ ጂጂጋ ቀበሌ 08

ፍቃዱን የሰጠዉ ባለሥልጣን ስም:- አቶ ከሊፍ መሐሙድ አደው
የሶማሌ የኅብረት ሥራ ማ/ማ/ማ ኤጀንሲ ምክትል ቢሮ ኃላፊ

ፊርማ:-

DDS Wakaalada Dhisida & Kobcinta Iskaashatooyinka

ማሳሰቢያ: - ይህ ጊዜያዊ ሰርተፍኬት ህግ ፊት ተቀባይነት የሚኖረው ከተመዘገበበት ዕለት ጀምሮ ለአንድ (1) ዓመት ብቻ መሆኑን እናሳውቃለን::

Xeer- Hoosaadka Iskaashatooyinka _____

Ee Tigor

Qodobka 1'aad: - Magaca Xarunta iyo Xuduuda degaan ahaaneed ee shaqada Iskaashatada.

1. ***Mag1aca Iskaashatada***
   Waxa iskaashatadan lagu magacaabi doonaa Iskaashatada Malabka.(Masuuliyadeedu kooban tahay) ee_____.

2. ***Xarunta Iskaashatada***
   Iskaashatadani waxay ka dhisan tahay Dawlada Degaanka Soomaalida
   Gobolka Fafan
   Degmada Jijiga
   Xaafada 08
   Goobta l oo yaqaano_____
   Tel._____
   S.Boosta_____

3. ***Xuduudaha Goobta Shaqo ee Iskaashatada***
   Goobta Shaqo ee Iskaashatada waxa ka xiga dhinacyada ama ay xuduud la leedahay dhinaca:-
   - Waqooyi_____
   - Koonfur_____
   - Bari_____
   - Galbeed_____

Qodobka 2'aad: - Ujeedada iyo Hawsha Iskaashatada

1. ***Ujeedada***
   b) Wadajir xubnuhu inay u xaliyaan dhibaatada mid-mid ayna u uga gudbi Karin.
   t) Si looga gudbo dhibaatooyinka bulsho, dhaqaale, deegaan ee xubnaha in la isku duba rido xooga, aqoonta iyo maalka xubnaha.
   j) Si ay xubnuhu qiimo sahlan ugu helaan adeega iyo gashiyada ay u baahan yihiin, in la yareeyo qiimaha iyo kharashka adeega waxsoosaarka loogu baahan yahay isla markaana si ay dhaqaalahooda uga faa'iideystaan in la sameeyo qiimo wanaagsan inay ku helaan adeegyadooda waxsoosaar.
   x) In la balaadhiyo tabaha aqoonta farsamada ee in lagu shaqeeyo loogu baahan yahay.

DDS Wakaalada Dhisida & Kobcinta Iskaashatooyinka

Kh) Dhibaatada khasaare ee soo gaadhi lahayd marka ay xubnuhu qof-qof u shaqaystaan si ay u yaraato mid kasta dhibaatada gaadhaysa una qaybsadaan wadajir.

d) Si kor loogu qaado dhaqan dhaqaalaha bulshada in la siiyo bulshada waxbarasho iyo tababaro.

r) Ujeedooyinka kale ee kuwan lamidka ah

2. ***Waxqabadka***

t) Si kor loogu qaado loona balaadhiyo wax soosarka iyo suuqgaynta Malabka..

u) T In ay helaan waxyaabaha ay ubaahanyihiin sida Malabka. IWM

v) Inay soo iibiyaan xubnuhu waxyaabaha ay ubaahanyihiin sida Malabka..

x) Inay xaqiijiso inay xubnuhu ka faa'iideestan tacab koodii

Kh) Inay a foontlc kaydinta lacagta ee xubnaha

D) Inay xubnaha iskaashatadu helaan dayn lacageed

R) Inay kor u qaadaan horumarka iyo dhaqaalaha bulshada iyo deeganka

G) Inay xubnuhu, xubnaha gudigamaaraybta shaqaalaha iskaashatada iyo bulshada degaankuba helan waxbarasho iyo tababaro isdabajooga uhorumariyaan dhaqaalaha io dhaqaanka bulsho .

Sh. Waxyaabaha kale ee u arkaan inay horumar ukeenaysana way qabanayaan.

Qodobka 3'aad: - Caqiidada/ Mabda'a/

Iskaashatadu ujeedadeeda si ay uga guul-gaadho, mabaadii'ida soo socota ayay raacayaan:-

1. Xubinimada Iskaashatadu dhamaan way u furan tahay cid kasta oo doonaysa inay noqoto xubin iskaashato oo ka faa'iideysanaysa adeega iskaashatada una diyaar ah waajibaadka xubinka laga doonayo iyada oo aan loo eegayn diin ama aragti siyaasadeed, qabiil, qowmiyadeed iyo sinji aan lagu kala soocin.

2. Waa hay'ad dimuqraadi ah oo ay xubnuhu si firfircoon uga qayb qaadanayaan dejinta siyaasadaha (Policy) iskaashatada, gudbinta go'aamada iyo hogaaminta, xubin kastaana hal cod ayuu leeyahay iyada oo aan lagu xisaabtamaynin cadadka saamiga uu iskaashatada ka iibsaday isla markaana dhamaan xubnuhu cod siman ayay leeyihiin.

3. Macaashaka iskaashatada waxa loo qaybin doonaa dhigaal loogu tala galo kor u qaadista adeega bulsho, kaydka, hawl-fulin. Inta baaqiga ka soo noqota xubnuhu saamiga sida ay u kala leeyihiin ayaa loogu qaybinayaa.

4. Iskaashatadu waxay u madax banana tahay is maamul ay heshiisyo kula gasho dawlada iyo qaybaha kalaba, kuna deymiso xubnaha lacagta ay ilaha kale ka hesho ee ka baxsan raasamaalkeeda, isla markaana waxay leedahay hab-dhaqan dimuqraadiyadeed iyada oo aan la is-gumaysanin dabagal iyo hubin ay gudeheeda isku samayso.

5. Iskaashatadu horumar wax ku ool ah si ay u hesho, tababar iyo waxbarasho ayaa la siinayaa shaqaaleheeda, hawl-wadeenada, gudiyada la doorto iyo xubnaha iskaashatadaba, isla markaana bulshada; gaar ahaan dhalinyarada waxaa lagu baraarujinayaa ururka iskaashatada macnihiisa iyo waxtarka uu leeyahay.

6. Iskaashatadu waxay si haboon isugu duba ridaysaa xubnaha si haboon in loogu adeego heer Degaan, Dal, Qaaradeed iyo heer Caalamiba, isla markaana waxay xoojin doontaa dhaqdhaqaaqa ururada iskaashatada.

7. Iskaashatadu waxay hirgelin doontaa talaabooyinka horumarka waaritaanka leh bulshada degaanka ay ku gaadhayso ee waafaqsan Siyaasadaha (Policies) ay ansixisay.

Qodobka 4'aad: - **<u>Shuruudaha Xubin Iskaashato Lagu Noqon Karo</u>**

Cid kasta oo buuxisa shuruudahan soo sacda xubin Iskaashato ayay noqon kartaa:-

1. Da'diisu inay tahay 14 sanno iyo wixii ka sareeya.

2. Qofka gadan kara tirada saamiga ugu yar iyo qiimaha diiwaangelinta ee xeerkan lagu xadiday.

3. Qofka u diyaarka ah dhamaan inuu fuliyo xeer-hoosaadka iskaashatada iyo xeer-hoosaadka gudaha, aqoonsana go'aanada kala duwan.

4. qof ku nool deegaanka iskaashatadu ay ka jirto ee shaqadiisa rasmiga ah ay beeraley tahay isla markaana aan waalay, maskaxda wax uga dhinayn.

Qodobka 5'aad: - Gudbinta Codsiga Xubinimo iyo Go'aan ka siinta

1. Codsiga xubin noqoshada waxa lagu soo diyaarinayaa foom ay iskaashatadu diyaarisay.

2. Codsiga xubin noqoshada ee loo soo gudbiyo hawl-wadeenka kedib marka ay si haboon uga baaraan-degaan hadii ay ogolaadaan_____ maalmood gudahood ayay ogolaanshahooda ku ogeysiinayaan.

3. Gudiga hawl-wadeenku codsadaha ay aqbali waayaan sababta oo qoraal ah ayay _____ maalmood gudahood ku ogeysiinayaan.

4. Gudiga hawl-wadeenku xubinka cusub ee ay ogolaadaan isla markaaba warbixin ayay shirerynaha ku siinayaan.

5. Codsadayaasha gudiga hawl-wadeenku ay ogolaan waayeen tabashadooda ambiil ayay shirweynaha ugu gudbisan karaan.

Qodobka 6'aad: - Lacagta Diiwaangelinta

1. Qof kasta oo raba xubin inuu noqdo marka la ogolaado xubinimadiisa hal mar ayuu diiwaangelinta _____Birr u bixinayaa.

2. Lacagta diiwaangelinta ee xubinku uu bixinayaa kuma xidhna tirade saamigiisu hadii uu bato ama yaraado.

3. Xaalad kasta oo timaada lacagta diiwaangelinta xubinka looma celin doono. Isla markaasna xubinku faa'iido kale kuma heli doono.

Qodobka 7'aad: - Lacagta Saamiga (Shares)

1. Qiimaha halka saami waa _____Birr.

2. Iskaashatadu gadis waxay u diyaarisay _____Saami, isla markaasna daraasada mustaqbalka iyada oo laga duulayo marka shirweynaha laga ansixiyo ayaa Saamiyo dheeraad iibintooda la diyaarin doonaa.

3. Qof kastaa si uu xubin iskaashato u noqdo ugu yaraan_____ saami waa inuu iibsado.

PDS Wakaalada Dhisida & Kobcinta Iskaashatooyinka

4. Saamiyada qofka iskaashatada kamidka ah kama badan karaa 10% ee wadarta saamiyada la gaday.
5. Lacagta saamiga ugu yare e xubinka looga baahan yahay, hadii xubinku awoodi waayo hal mar inuu ku bixiyo _____ bilood inuu ku dhamaystiro ayaa wakhti loo siin karaa, isla markaasna xubinimo looma diiwaangelin doono ilaa inta uu ka dhamaystirayo.

6. Saamiyada ay iibsadeen xubuhu waxaa la siin doonaa warqad cadayn ah oo sharci ah.

7. Saamiga ay xubnuhu iibsadeen waxa lagu bixin doonaa qaybta saamiga sida waafaqsan qodobka 34'aad ee xeer-hoosaadkan, qodob-hoosaadkiisa 2aad.

8. Xubnaha gata saamiga ka badan tirada ugu yare ee saamiga awood ayay u leeyihiin inay iibiyaan ama wareejiyaan saamiga dheeraadka ah dhamaantiis ama badhkiis.

9. Marka iskaashatada la aasaaso waa in 1/5 (shan meelood hal meel) laga gado tirada saamiga xubnaha inta kalana waa in lagu gado mudo afar sano gudahood laga bilaabo maalinta la diwaan galiyay.

Qodobka 8'aad: - <u>Xuquuqda Iyo Waajibaadka Xubnaha</u>

1. Cid kasta oo xubin iskaashato ah, xuquuqahan soo socda ayay yeelan doontaa:-

   b) Inuu helo faa'iidooyinka iyo adeegyada ay iskaashatadu bixinayso ee waafaqsan shuruucda iyo xeerka iskaashatada.

   r) Inuu ka qayb galo shirweynaha iskaashatada, ka dhiibto aragtidiisa isla markaasna ka codeeyo.

   j) Inuu wax doorto lana doorto.

   x) Xubinimada inuu ka tago iyada oo loo tixgelinayo mudada uu iskaashatada kamid ahaa faa'iidadeeda.

   Kh) Inuu magacawdo cida dhaxlaysa.

   c) Xubnaha Maaraynta iyo Shaqaalaha Iskaashatada inuu su'aal cabasho ah uga gudbin karo arrin kasta oo iskaashatada khusaysa, lagana siiyo jawaab.

DDS Wakaalada Dhisida & Kobcinta Iskaashatooyinka

2. Waajibaadyada soo socda ayaa xubin kasta oo Iskaashatada ah lagu yeelan doonaa:-

b) Inuu fuliyo isla markaana qadariyo go'aanada shuruucda kala duwan ee xeer-hoosaadka iskaashatada iyo xeerarka gudaha iyo shuruucda iyo baaqyada kale ee ururada iskaashatada.

t) Sida uu yahay Go'aanka Iskaashatadu inuu qabto shaqada la qabanayo.

j) Inuu bixiyo lacagta saamiga iyo tan diiwaangelinta.

x) Inuu xafido, dhaqaaleeyana hantida guud ee Iskaashatada.

Kh) Si haboon inuu u guto xilka iskaashatadu u dhiibato.

Qodobka 9'aad: - <u>Masuuliyada Guud ee Xubnaha</u>

1. Iskaashatada khasaare hadii uu ku yimaado dhamaan xubnaha in khasaaraha loo qaybiyo ayay iskaashatadu xaq ugu leedahay.

2. Iyada oo deyn lagu leeyahay, hadii ay iskaashatadu kala tagto, xubin kasta masuuliyad ayaa ka saran bixinta deynta, mana noqon doonto wax ka sareeya Saamiga iyo faa'iidada uu iskaashatada ku lahaa.

Qodobka 10'aad: - <u>Magacaabida Dhaxlaha</u>

1. Xubin kasta saamiga iyo faa'iidadada iskaashatada uu ku leeyahay dhaxle ayuu u magacaaban karaa. Isla markaana magacaabidu waxay ku ansaxmaysaa oo keliya marka uu saddex markhaati hor keeno xafiiska iskaashatada oo ay saddex markhaati sexeexaan.

2. Hadii uu geeriyoodo ama degaanka uu ka dheeraado, xubinka dhaxle aan magacaabanin Maxkamada ayaa la wareegaysa kedibna cida ay u go'aamisa dhaxalkiisa ayaa qaadanaysa.

3. Xubinka geeriyooda hantida iyo faa'iidada kale ee iskaashatadu u hayso, hadii ay jirto deyn lagu lahaa marka laga jaro ayaa wixii u soo hadha dhaxlaha la siinayaa.

4. Dhaxluhu hadii uu iskaashatada xubin ka yahay ama uu buuxin karo shuruudaha xubinimo, ayuu saamigii kula wareegayaa, isla markaana

Wakaalada Dhisida & Kobcinta Iskaashatooyinka

hadii uu ka bato xadka lagu xadiday qodobka 7'aad ee xeerkan qodob hoosaadkiisa 4'aad, dheeraadka lacag ayaa loogu bedeli doonaa.

Qodobka 11'aad: - Habka Wareejinta Saamiga iyo Faa'iidada

1. Xubin kasta waxa uu wareejin karaa Saamigiisa ama faa'iidadiisa marka uu haysto mudo aan hal sano ka yarayn, kana ogolaadaan gudiga hawl-wadeenadu.

2. Saamiyada ama Faa'iidadada ama lacagta lagu bixiyey sida waafaqsan qodobka 10'aad ee xeerkan, ma jiri doonto sabab uu qof saddexaad su'aal uga weydiiyo iskaashatada.

Qodobka 12'aad: - Faylka iyo Diiwaanka Xubnaha

Fayla iyo Diiwaanka xubnaha Iskaashatadu waxay ku diyaarin doontaa faahfaahinta xogaha soo socda:-

1. Xubin kasta Magaca, Ciwaanka, Shaqada, Da'da, Heerka Aqoonta, Sinjiga Lab/Dhedig.

2. Xubnaha Shaqsiyaadka ah maalinta ay soo galeen iyo maalinta ay ka baxeen.

3. Tirada lacagta saamiga iyo diiwaangelinta xubinku bixiyey.

4. Xubin kasta magaca iyo cinwaanka dhaxlihiisa.

5. Xogta Tirada qoyska.

6. Gudiga hawl-wadeenku sida ay ku aamineen iyo faahfaahinta xogaha kale.

Qodobka 13'aad: - Waayitaanka Xubinimo iyo Bixinta Lacagta

Xubinimada ayuu ku waayayaa xubin kasta oo ku sifooba xaaladahan soo socda:-

DDS Wakaalada Dhisida & Kobcinta Iskaashatooyinka

1. Iskaashatada Inuu ka baxo marka qoraal uu ku soo codsado isla markaasna arrintiisa lagaga wada hadlo fadhiga gudiga hawl-wadeenada ee xubinimadii lagala noqdo.

2. Marka uu xeerka, nidaamyada iyo go'aamada uu u hogaansami waayo, isla markaasna uu ku saxmi waayo waanada iyo digniinaha ay iskaashatadu siiso.

3. Ficil majaro habaabiya ama caajis geliya ujeedada iyo waxqabadka iskaashatada marka uu la yimaado.

4. Marka uu ka tago goobta iskaashatadu ka shaqaynayso ogaansho la'aan.

5. Mudo_____ bilood ah isaga oo aan wax xidhiidh ah iskaashatada la yeelan marka uu iskiis isaga maqnaado.

6. Arrimaha lagu qeexay qodobkan qodob hoosaadyadiisa 2,3,4 iyo 5 mid kamid ah ama ka badan xubinka sameeya gudiga hawl-wadeenadu markay si haboon u dersaan una baadhaan kedib, waxay ka joojinayaan dhamaan dhaqdhaqaaqa shaqada, isla markaasna xog lagu kalsoonaado iyo cadaymaha oo wada socda ay shirweynaha u gudbinayaan, waxayna ka go'aaminayaan xubinimada in lagala noqdo.

7. Xubinka xubinimada lagala noqdo qodobkan qodob-hoosaadkiisa 1'aad waxaan ahayn hadii uu mar labaad soo codado xubinimo waxa uu noqon karaa xubin marka shirweynaha la hor dhigo ee ay go'aamiyaan oo keliya.

Qodobka 14'aad: - <u>Habka Cod-bixinta</u>

1. Xubin kasta waa inuu shirweynaha goob-joognimo kaga qayb galo, dhiibtada codkiisa, isla markaana wakiilasho laguma cod bixin karo.

2. Iyada oo aan lagu xisaabtami doonin tirade saami ee uu haysto ayuu xubin kastaa yeelan doonaa hal cod oo keliya.

3. Shirweyne kasta iyo go'aamada gudiyada kala duwan, waxaa lagu go'aan qaadanayaa cod-dheeri, isla markaasna hadii uu codku is le'ekaado Shir Gudoomiyuhu wuxuu yeelan doonaa cod dheeri ah oo lagu go'aan qaato.

DDS Wakaalada Dhisida & Kobcinta Iskaashatooyinka

Qodobka 15'aad: - <u>Shirweynaha Iskaashatada</u>

1. *Nidaamka Shirweynaha:-*

b) Shirweynaha Iskaashatadu waa Shirka ay u dhan yihiin xubnaha iskaashatadu.

t) Shirweynaha Iskaashatadu waa awooda ugu saraysa ee go'aanka kama danbaysta ah lagaga gaadho arrin kasta oo iskaashatada khusaysa.

j) Bisha_____iyo Bisha_____ ayey _____ goor sannadkiiba shirweyne iskaashatadu yeelan doontaa.

x) Mar kasta oo gudiga hawl-wadeenadu ama tiro aan ka yarayn 1/3 xubnaha iskaashatadu ay codsadaan shirweyne in la isugu yimaado, mudo 15 maalmood gudahood ah ayay gudiga hawl-wadeenadu ku baaqayaan in shirweyne la isugu yimaado, isla markaasna gudiga hawl-wadeenadu waxay mar kasta u yeedhi karaan shir aan caadi ahayn.

Kh) Shirweynuhu go'aamadiisa rasmi ahaan waxa ay ku hirgeli karaan marka xubnaha iskaashatada kala badh in ka badani ay shirweynaha ka soo qayb galaan.

d) Iyada oo qodobkan qodob-hoosaadkiisa koowaad xarafkiisa (kh) uu sidiisa ahaan doono, waxaa khasab ah xubnaha iskaashatada ugu yaraan ½ in ka badan inay isku raacaan marka la qabanayo shirka aan caadiga ahayn ee lagaga go'aan qaadanayo arrimaha culus ee rejada iskaashatada walaac gelisa sida; bur-bur, kala jab, lamidow/Taxaaluf/, Xeer habayn iyo Xeer bedelid.

r) Baaqa hore hadi aan la helin tirade ugu yar xubnaha shirku ku qabsoomayo, marlabaad waxa lagu baaqayaa 15-ka maalmood ee xigta shir in la isugu yimaado.

2. *<u>Awooda iyo Masuuliyada Shirweynaha</u>*

Shirweynuhu isaga oo qiimaynaya dhamaan dhaqdhaqaaqa shaqada iskaashatada ayuu qaabkan u gudbiyaa go'aanadiisa:-

DDS Wakaalada Dhisida & Kobcinta Iskaashatooyinka

b) Xubnaha Gudiga Hawl-wadeenada, kuwa Gudiga Dabagalka iyo Gudi-hoosaadyada , ayuu doortaa isla markaasna awoodaa inuu eryo.

t) Qorshaha Shaqada iyo Miisaaniyada Iskaashatada ayuu ansixiyaa.

j) Wuxuu qiimeeyaa warbixinta shaqada iskaashatada iyo natiijada baadhista Xisaabta, isla markaana go'aamiyaa horgelintooda.

x) Wuxuu go'aamiyaa kala qoondaynta macaashka saafiga ah.

Kh) Wuxuu go'aamiyaa xadka lacagta la deyminayo iskaashatooyinka la midka ah iyo gudiga hawl-wadeenku xadka ay shaqada u deynsan karaan.

d) Wuxuu ansixiyaa, dib u habayna ku sameeyaa, isla markaasna bedelaa xeer-hoosaadka, xeerarka gudaha iyo nidaamyada/shuruucda iskaashatada.

r) Wuxuu ka go'aan gaadhaa tirtirida, qaybinta, isku-darsiga iyo balaadhinta iskaashatada.

s) Xubno tiradoodu _____ tahay oo gudiga hawl-wadeenada la sexeexa sugnaanta codka shirweynaha ayuu magacaabaa.

Sh) Arrimaha kale ee ka weynaada awooda hawl-wadeenada ayuu fuliyaa.

Qodobka 16'aad: -<u>Buuxinta Shuruudaha Xubin-ka-mid Noqoshada Gudiyada Iskaashato.</u>

Xubin kasta oo Iskaashatada kamid ah, in kasta oo uu xaq u leeyahay in loo doorto xubin gudi Iskaashato, hadana dhibaatooyinka soo socda mid kamid ah hadii uu ku sifoobo looma dooran karo:-

1. Deyn uu Iskaashatada ka qaatay hadii uu xilligeeda ku soo celin waayo sabab la'aan.

2. Hadii uu ka shaqeeyo shaqo la xidhiidha hawlaha iskaashatadu qabato oo faa'iidadiisa ka hor imanaysa.

3. Hadii lagu dacweeyey hada kahor dhaqan xumo iyo khiyaamo oo lagu xukumay ama xil iskaashatadu u dhiibatay lacag iyo hanti ku

DDS Wakaaladda Dhisida & Kobcinta Iskaashatooyinka

lunsaday isla markaana uu fuliyey talaabooyin kale oo masuuliyad xumo ah.

4. Hadii uu yahay shaqaalaha la qoray ee iskaashatada ama loo doorto gudiyada kale ee iskaashatada.

5. Hadii uu xilal badan isku hayo.

Qodobka 17'aad: - <u>Nidaamka Doorashada</u>

1. Iskaashatadu marka ay fulinayso doorashada xubnaha gudi kasta waa inay goob jog ka noqdaan saddex xubnood oo ka mid ah gudiga doorashada.

2. Xubnaha gudiga doorashadu xilliga shirweynaha waxay u dooranayaan gudiga cusub ee doorashada gudigii hore ee hogaaminta iskaashatada.

3. Saddex musharax ayaa u tartami doona cida noqonaysa Gudoomiye, Xoghaye iyo Lacaghayaha Iskaashatada, mid kastaana waxaa loo dooranayaa hadba Kan ugu cod bata.

4. Doorashada xubnaha gudiyada kale, waxa la samaynayaa tirade xubnaha gudiga ee loo baahan yahay ugu yaraan in dheeraad ahaan loogu daro saddex xubnood oo tartamayaal dheeri ah.

5. Doorashadu marka ay qabsoonto gudiga doorashada iyo kuwa la sexeexayaa mudo 7-maalmood ah go'aankooda inay ugu gudbiyaan Xafiiska Iskaashatooyinka.

6. Gudiga doorashadu waxay si sharci ah xilka ugu kala wareejinayaan gudiga cusub iyo gudigii hore ee xilka laga qaaday.

Qodobka 18'aad: - <u>Gudiga Hogaaminta Iskaashatada</u>

1. ***Qaab-dhismeedka Guud ee Gudiga Hogaaminta Iskaashatada:-***

   b) Waxay yeelan doontaa gudi hawl-wadeen oo ka kooban ___ xubnood oo hoos tagta masuuliyada shirweynaha.

   t) Gudiga Hawl-wadeenka oo xilka hayn doona muddo 3-sannadood ah mar labaad ayaa la dooran karaa xubinka ka tirsan gudiga hawl-

wadeenada hadii loo baahdo, balse lama dooran karo wax ka badan laba goor oo xidhiidh ah.

j) Xubin kamid ah gudiga hawl-wadeenadu dhibaato ka tan weynaata awgeed hadii uu gudiga uga sii mid ahaan Kari waayo, wuxuu markaaba Xafiiska Iskaashatada ku soo ogeysiinayaa qoraal in go'aan la siiyo isla markaana xubnaha iyaga oo aan wakhtigooda shaqo dhamaysan xubinimadii gudiga hawl-wadeenada ka taga shirweyne degdeg ah lagu dooranayaa xubnaha bedelkooda noqonaya.

x) Shirka Gudiga Hawl-wadeenadu mars kasta wuxuu kooramka shirku ku buuxsamayaa marka ay ka soo qayb galaan xubnaha gudiga hawl-wadeenada kala badh in ka badan oo keliya.

Kh) Xubnaha gudiga hawl-wadeenadu dareenkooda masuuli-yadeed oo u siman shaqada iskaashatada ayay wadajir ama kala qaybsi u fulinayaan iyaga oo isku duba-ridan.

d) Gudiga Hawl-wadeenku shaqada waxay u diyaariyaan xeer-hoosaadka sida ugu haboon hawsha loogu socodsiinayo isla markaana shirweynuhu marka uu u ansixiyo ayay sameeyaan in la hirgeliyo.

2. ***Awooda iyo Masuuliyada Gudiga Hawl-wadeenada***

b) Waxay diyaariyaan qorshe-sannadeedka miisaaniyada iyo shaqada Iskaashatada, marka la ogolaadana way hirgeliyaan.

t) Waxay sameeyaan diiwaanada iskaashatadu ay u baahan tahay, raad-raacyada iyo faylasha in la wada keeno isla markaasna in sida ugu haboon shaqada loogu wada qabto loona xafido.

j) Waxay fuliyaan hawlaha kala ah; gadida saamiga, u kala bedelka saamiga ee xubnaha tagaya iyo xubnaha cusub.

x) Waxay ururiyaan dekhliga iskaashatada, isla markaasna waxay go'aamiyaan lacagaha sida loo bixinayo.

Kh) Waxay nidaam u jeexaan hantida iyo lacagta sida loogu shaqaynayo iyo sida loo ilaalinayo, isla markaana dabagal ayay ku sameeyaan

DDS Wakaalada Dhisida & Kobcinta Iskaashatooyinka

d) Waxay sameeyaan maamulka xubnaha gudiyada kala duwan iyo shaqaalaynta shaqaalaha, sidoo kale; waxay dardar geliyaan hawlaha kale ee iskaashatada, isla markaana waxay dejiyaan nidaamyada iyo xeer hoodaadyada sare loogu qaadi karo adeegyada iskaashatada, marka shirweynaha lagu ansixiyana way hirgeliyaan.

r) Shirweynaha ayay isugu yeedhaan, hogaamiyaan isla markaasna hadal-qoraal (munite) ka sameeyaan.

s) Warbixin ayay shirweynaha ka siiyaan baadhista xisaabta iyo dhaqdhaqaaqa waxqabadka shaqo oo qeexan.

Sh) Waxay daraasado ku sameeyaan qaabka ay iskaashatadu ku macaashi karto kuna noqon karto hay'ad cudud dhaqaale leh.

Dh) Waxay suurto gelisaan xaaladaha uu ku adkaan karo xidhiidhka xubnaha iyo iskaashatada u dhexeeya.

c) Xilli kasta iyo xaalad kasta waxay u taagan tahay arrimaha iskaashatada khuseeya inay metesho.

g) Go'aamada kale ee mar kasta shirweynaha lagu go'aamiyo ayay fulisaa.

3. ***Awooda iyo Masuuliyada Gudoomiyaha, Xoghayaha & Lacag Hayaha***

b) ***Gudoomiyuhu isaga oo gudiga hawl-wadeenka hoos tegi doona*** :-

1. Isaga oo iskaashatada ka wakiil ah ayaa arrin kasta oo iskaashatadu leedahay lagu dacweynayaa waxna uu ku dacweynayaa.

2. Wuxuu hagaa shirka gudiga hawl-wadeenka iyo shirweynahaba.

3. Iskaashatada inta maareeye loo samayn ayuu masuul ahaan u sii wadayaa dhamaan hawlaha maamulka, wuxuuna maamulaa shaqaalaha, isla markaana wuxuu amraa lacagaha baxaya ansixiyaana.

DDS Wakaalada Dhisida & Kobcinta Iskaashatooyinka

4. Dhamaan xubnaha gudiga hawl-wadeenka ayuu mid kasta dabagal ku sameeyaa inuu masuuliyadiisa ka soo baxay.

5. Masuul ahaan ayuu u hirgeliyaa dhamaan go'aamada shirweynaha iyo kuwa gudiga hawl-wadeenka.

t) ***Xoghayaha***

Xoghayuhu isaga oo gudoomiyaha Iskaashatada hoos imanaya ayuu:-

1. Hadal qoraalka gudiga hawl-wadeenka iyo shirweynaha ayuu hayaa.

2. Warqadaha Iskaashatada ay cid kale iskaashatada is weydaarsanayaan ayuu u fuliyaa.

3. Wuxuu kormeeraa in la xafiday isla markaana si haboon shaqada loo waafajiyey raad-raacyada xubnaha iyo diiwaanada iyo faylasha iskaashatada.

4. Wuxuu diyaariyaa, ururiyaana ajendayaasha loo gudbinayo shirweynaha iyo shirarka gudiga hawl-wadeenka.

5. Marka Gudoomiyuhu maqan yahay dhamaan shaqadiisii ayuu masuul ahaan u sii wadaa.

6. Wuxuu fuliyaa masuuliyada dheeraadka ah ee gudoomiyaha iyo gudiga hawl-wadeenku ay u xil saaraan.

j) ***Lacag Hayaha***

Lacag hayuhu isaga oo gudoomiyaha iskaashatada hoos imanaya ayuu:-

1. Dhamaan dekhliyada iskaashatada ku ururiyaa boonooyinka iskaashatada ee rasmiga ah oo keliya.

2. Dhamaan kharashayada loogu baahan yahay ee uu gudoomiyuhu ku amro ayuu ku bixinayaa foomka amarka kharash-bixinta ee iskaashatada.

DDS Wakaalada Dhisida & Kobcinta Iskaashatooyinka

3. Wuxuu culays saarayaa xilliga ku haboon in la xisaab xidho lacagaha moodheelada ku taagan.

4. Arrimaha lacag la xidhiidha ee gudiga hawl-wadeenka iskaashatadu ay xeer-hoosaadka ku xaddiday ayuu si taxadar leh u fuliyaa.

5. Gacan ama qasnad kuma hayn karo wax ka badan _____ Birr, hadii aan qoraal lagu amrin lacagta intaas ka badan waxaa la dhigayaa goobta ay gudigu u cayinto, waxaana lagu haynayaa mudo _____maalmood ah iyada oo warbixinteeda loo soo gudbinayo madaxa Xisaabaadka ama Xisaabiyaha.

6. Dhaqdhaqaaqa lacagta ayuu mar kasta diiwaan gelinayaa isla markaasna sugnaanta xisaabta ayuu bil kasta dhamaadka ay xisaabiyaha isla xaqiijinayaan.

7. Wuxuu fulinayaa hawlaha ay gudoomiyaha ama Gudiga hawl-wadeenadu ay u xil saaraan.

Qodobka 19'aad: - <u>Gudiga Dabagalka Iskaashatada.</u>

1. ***<u>Qaab-dhismeedka Gudiga Dabagalka ee Iskaashatada</u>***

b) Gudiga Dabagalka oo Saddex xubnood ka koobnaan doona, waxay hoos imanayaan Shirweynaha.

t) Gudoomiyaha Gudiga Dabagalku goob-jooge ayuu ka noqon doonaa shir kasta oo gudiga hawl-wadeenku yeelato isla markaasna cod kuma yeelan doono go'aanada gudiga hawl-wadeenka.

j) Waxa haboon xubnaha gudigu qaab ka haboon inay u habeeyaan sidii xisaabaadka iskaashatada loo diyaarin jirey.

x) Gudigu waxay shaqayn doonaan 3-sanno, isla markaasna mar kale ayaa xubinka la dooran karaa, balse laba dooran karo wax ka badan laba jeer.

2. ***<u>Awooda iyo Masuuliyada Gudiga Dabagalka</u>***

b) Waxay daba gelayaan hantida ma guurtada ah iyo tan dhaqdhaqaaqda ee Iskaashatada in sida ugu haboon shaqada

loogu qabtay loona xafiday sida xeerka iskaashatada waafaqsan isla markaasna in la soo hagaajiyo ayay culays saarayaan.

t) Waxay hubiyaan _____Bilood hal mar si sax ah in loo tirakoobo loona hubiyo lacagta iyo hantida iskaashatada.

j) Waxay dabagal ku sameeyaan xubnaha gudiga hawl-wadeenka, Gudi-hoosaadyada iyo shaqaaluhu inay si haboon u gutaan xilka iyo masuuliyadooda.

x) Dhamaan kharashyada iyo dekhliyada iyo kharashyada iskaashatada ee rasmiga ah in lagu qoray raad-raacyada sharciga ah, sidoo kale; in shaqada la waafajiyey si taxadar ahna loo xafido faylasha iyo shuruucda kala duwan, diiwaanada xubnaha iyo raad-raacyada iskaashatada ee xisaabaadka ayay xaqiijinayaan.

Kh) Deymaha Iskaashatada ee aan la bixinin iyo dekhliyada aan la ururin ayay dabagal ku samaynayaan, talaabada ku haboona ka qaadayaan.

d) Waxay daba galaan hirgelinta xeer-hoosaadka Iskaashatada iyo Xeerarka gudaha.

r) Waxay daba galaan inuu sidii loo baahnaa xoghayuhu hadal-qoraalkii uga sameeyey dhaqdhaqaaqa shaqada iyo go'aanada la gaadhay.

s) Xilkooda iyo masuuliyadooda si waafaqsan waxay shirweynaha ugu gudbiyaan qoraal hawlaha ka qabsoomay iskaashatada iyo dhibaatooyinkii lala kulmay iyaga oo talo-bixintoodana raacinaya.

Qodobka 20'aad: - <u>Habka Aasaasida Gudi-hoosaadyada</u>

Iyada oo la samaynayo daraasad la xidhiidha waxqabadka Iskaashatada, ayaa si loo dardar geliyo shaqada loona helo adeegyada loo baahan yahay oo tayo leh la dhisi karaa gudi-hoosaadyo sida; Gudiga amaahda iyo tashiilka, Gudiga Maal-gelinta, IWM... isla markaana nooca gudiga loo baahan yahay, tirade xubnaha, awooda iyo masuuliyada, IWM...Gudiga hawl-wadeenada si faahfaahsan marka ay u dersaan, ayaa loo gudbinayaa Shirweynaha laguna ansixinayaa.

Qodobka 21'aad: - <u>Habka Shaqaalaynta Shaqaalaha</u>

DDS Wakaalada Dhisida & Kobcinta Iskaashatooyinka

1. Shaqooyinka u baahan aqoonta iyo khibradaha dheeraadka ah Iskaashatadu shaqaale shaqada ka shaqeeya ayay u shaqaalaysanaysaa.

2. Shaqaalaha ay Iskaashatadu shaqaalaysanayso dhamaan ku meel-gaadh ayay ahaanayaan.

3. Sharciga Maamulka Shaqaalaha ee Iskaashatada ayaa lagu qeexi doonaa cadadka shaqaalaha la shaqaalaynayo, Boosaska shaqada, Khibaradaha iyo aqoonta looga baahan yahay, Saacadaha shaqada, Xuquuqda Lacagta Mushaharka iyo qaabka loo maamulayo.

Qodobka 22'aad: - <u>Habka Xadaynta Amaahda (Deynta)</u>

Iskaashatadu waxay yeelan doontaa qaab deymeed oo laba weji leh:-

1. Deynta Iskaashatadu ay ka hesho Laamaha Deynta bixiyaha:-

   b) Iskaashatadu iyada oo daraasad ku samaynaysa sida ay awoodeeda lacagta u adkayn lahayd, dhaqdhaqaaqa wax-qabadkana u fulin lahayd uguna guuleysato ujeedadeeda, ayay sidii suuro gal u noqota deyn uga qaadan kartaa Hay'adaha lacagta eek ala duwan.

   t) Iskaashatadu hal sannad-miisaaniyadeed hadii ay deymeysanayso in ka badan _____ ilaa _____ Birr, Shirweynaha ayaa lagu go'aaminayaa.

   j) Saddex nooc ayay u qaybsamaysaa deynta ay Iskaashatadu qaadanayso:-
      1. Mid mudo hal sanno gudeheed ah deyn bixiyaha loogu celinayo (Xilli gaaban).

      2. Mid deyn bixiyaha loogu celinayo mudo 2 ilaa 3 sanno gudahood ah (Xilli Dhexe).

      3. Iyo deyn gaadha mudo 5 Sanno ka badan (Xilli Dheer).

2. ***<u>Deynta Iskaashatadu Bixinayso</u>***

   b) Iyada oo Iskaashatadu daraasad ku samaynaysa kaydka raasamaalka ay haysato iyo ilaha ay lacagta ka hesho ee dibeda

DCS Wakaaladda Dhisida & Kobcinta Iskaashatooyinka

ayay deyn siin kartaa xubnaha iyo Iskaashato kale oo ku dhisan si waafaqsan Beyaanka 147/1991.

t) Sharciga Deynta loo diyaarinayo ayaa lagu go'aamin doonaa dheef-korodhka laga ururinayo meelaha ay deynta siiso iskaashatadu.

j) Gudiga Hawl-wadeenadu iyaga oo ka go'aaminaya Shirweynaha xadka deynta loo fasaxayo heer shkhsi sannad miisaaniyadeedka, ayaa _____ Birr ilaa _____Birr la siinayaa.

x) Deyn sannadeedku waa sida waafaqsan Qodobkan, Qodob-hoosaadkiisa 1'aad, Xarafkiisa (j).

kh) Faahfaahinta Deyn-bixinta lagu fulinayo waxaa lagu go'aamin doonaa sharciga deynta .

Qodobka 23'aad: - <u>Adeeg-Bixinta iyo Gashiyada</u>

1. Iyada oo la raacayo codsiyada iyo rabitaanka xubnaha ayaa la samaynayaa in waxsoosaarka deegaanka kor loo qaado.

2. Waxyaabaha Wersheduhu sameeyaan iyo Technology-yada ay xubnuhu nolol ahaan iyo shaqo ahaanba ugu baahan yihiin, inta qiimo sahlan lagu soo iibiyo ayaa iyagana qiimo sahlan lagaga qaadayaa.

3. Sharciga maal-gashiga ayaa lagu go'aamin doonaa faahfaahinta maalgelinta loo samaynayo iyada oo loo eegayo hab-dhaqanka adeeg-bixinta iyo wax soo saarkiisa.

Qodobka 24'aad: - Kala <u>Horaynta Amaahda loo Bixinayo</u>

Hadii ay jirto lacag deyn ah ama sabab kale ah oo ay Iskaashatadu ka ururinayso xubnaha ama Iskaashatooyinka la midka ah, sida soo socota ayaa look ala horaysiinayaa:-

1. Marka hore waxaa la ururinayaa khasaaraha iyo mag-dhawga kharashyada ku baxa deyn ururinta.

2. Marxalada labaadna, Kor-saarada ayaa loo ururinayaa si waafaqsan xeerka jaran-jarada korsaarka ee Iskaashatada.

DDS Wakaaladda Dhisida & Kobcinta Iskaashatooyinka

3. Ugu danbayna lacagta weyn ah ayaa la ururinayaa.

Qodobka 25'aad: - U Sahlida Amaah-bixinta Xubnaha

Amaahda Iskaashatadu ay xubinka ka doonayso, hadii xubinku awoodi waayo inuu iska bixiyo, Iskaashatadu waxay u fududaynaysaa in laga jaro Saamiga ama Faa'iidadada kale ee xubinku Iskaashatada ku leeyahay.

Qodobka 26'aad: - Aqoonsiga Lahaanshaha Qaybta ama Faa'iidadada inaan la gadi Karin.

Xubin kasta dhamaan qaybta iyo faa'iidadada uu Iskaashatada ku leeyahay, wixii aan ka ahayn sida lagu go'aamiyey Qodobka 25'aad ee xeerkan, qof saddexaad heshiis lagula galo ama damco deyn lagu leeyahay inuu ku bixiyo ama uu cid amaahiyo, dhinacaas saddexaad looma aqoonsan doono mana iibin karo.

Qodobka 27'aad: - Habka la Isugu Celinayo Qaybaha iyo Faa'iidooyinka Kale

1. Xubinku hadii uu rabitaankiisa ama go'aan Iskaashatadu ka gaadhay kaga baxo Iskaashatada iyo hadii uu geeriyoodaba sadkii (Qaybtii) iyo Faa'iidooyinkii uu xubinku lahaa; kedib marka laga guto sida uu qeexayo Qodobka 25'aad ee xeerkani, dhamaan lacagta u soo hadhay xubinka waa loo celinayaa, hadii uu geeriyoodayna dhaxlihiisa ayaa la siinayaa.

2. Xubin kaata iyada oo sadka (Qaybta) iyo faa'iidada loo aqoonsanayaa ay ku xidhan tahay hadba mudada uu iskaashatada ku jirey oo keliya, xaqiisa waxa la bixin doonaa marka xisaab-xidhka sannadka la sameeyo kedib.

3. Sadka (Qaybta) iyo Faa'iidada xubinka loo celinayo hadii ay Iskaashatadu dhibaato lacag la'aana awgeed awoodi weydo hal mar ah inay ku bixiso, waxaa loo qaban karaa mudo ku siman _____Bilood oo keliya.

4. Faa'iidada xubinka la siinayo sinaba looguma iibin karo hantida ma guurtada ah ee Iskaashatada.

DDS Wakaaladda Dhisida & Kobcinta Iskaashatooyinka

Qodobka 28'aad: - <u>Ilaha Lacagta ee Iskaashatada</u>

Ilaha ugu waaweyn ee lacagta ay Iskaashatadu waa:-

1. Lacagta ay xubnuhu bixiyaan ee diiwaangelinta xubnaha.
2. Iibinta Saamiyada.
3. Macaashka laga helo dhaqdhaqaaqa Iskaashatada.
4. Deeqda
5. Deynta
6. Iyo dekhliyada kala duwan.

Qodobka 29'aad: - <u>Habka Xafidida Lacagta Iskaashatada</u>

1. Lacagta uu hayo lacag-hayuhu mars kasta iyo xaalad kastaba waxaa lagu xafidi doonaa khasnada Iskaashatada.
2. Hadba sida ay iskaashatadu ugu baahan tahay waxay Bankiga ugu dhaw ka furan kartaa Akoontiga Kaydka, Akoontiga Dhaqdhaqaaqa ama Akoontiga Mudaysan.
3. Iyada oo Akoonka lagu furi doono magaca Iskaashatada, ayay Gudiga Hawl-wadeenka Iskaashatadu hadal-qoraal ku go'aaminayaan Akoonku inuu ku dhaqdhaqaaqi doono awooda Gudoomiyaha, Lacag-hayaha iyo sexeexooda.
4. Qodobka 18'aad, Qodob-hoosaadkiisa 3'aad, Xarafkiisa (j) ee lambarka 5'aad isaga oo sidiisa ahaan doona, lacag kasta oo ay Iskaashatadu leedahay waa in ____ maalmood gudahood laga saaro Khasnada laguna shubo Baanka.

Qodobka 30'aad: - <u>Raad-raacyada Xisaabta & Diiwaanada Iskaashatada</u>

DDS Wakaaladda Dhisida & Kobcinta Iskaashatooyinka

Raad-raacyada iyo diiwaanada kala duwan iyada oo maalin kasta loogu shaqayn doono hadba sida ay shaqada iskaashatadu tahay, ayay ugu muhiimsan yihiin kuwan hoos ku xusan:-

1. Diiwaanka Xubnaha
2. Diiwaanka Hantida
3. Diiwaanka Hadal-qoraalka
4. Moodheelka gelida
5. Foomka amarka bixida.
6. Diiwaanka Gelida (Xeraynta).
7. Diiwaanka Bixita.
8. Looxa Xisaabta xubnaha ee shakhsiga.
9. Looxa Xisaabta guud ee Iskaashatada.
10. Raad-raacyada Faahfaahinta heshiisyada deynta.
11. Raad-raacyada lagula kala wareego Alaabta.
12. Faktuurada Iibka.
13. Raad-raacyada foomamka kala duwan.

Qodobka 31'aad: - <u>Habka Bixinta Habeen-dhaxyada & Lacagaha Kale</u>

1. Xubnaha Gudiyada kala duwan ee Iskaashatada wax lacag ah laguma siinayo adeegyo ay siinayaan xubnahooda kale iyo Iskaashatadooda. Hase ahaatee, hadii ay shaqo Iskaashatadu leedahay ugu baxayaan goob ka baxsan goobta shaqada Iskaashatada waxa la siin doonaa habeen-dhaxa mudada shaqada ay ku maqnaayeen iyo lacagta noolka, faahfaahinta habka loo fulinayana xeer-hoosaadka ayaa lagu go'aaminayaa.

2. Hadii uu xubin lacagtiisa ku bixiyo shaqo Iskaashatadu leedahay, si waafaqsan cadaynta uu soo gudbiyo ee sharciga ah ayaa lacagtiisa loogu celinayaa, nooc kasta oo kharashna kahor inta aan la bixin waa in Gudiga Hawl-wadeenka la ogeysiiyo isla markaana fasaxaan.

Qodobka 32'aad: - <u>Habka Hubinta & Baadhista Xisaabaadka</u>

1. Guud ahaan nidaamka shaqada loo fuliyey marka xeerka iyo shuruucda uu waafaqsan yahay, ugu yaraan sannadkii hal mar ayaa

DDS Waaxda Dhisida & Kobcinta Iskaashatooyinka

baadhitaan lagu samaynayaa raad-raacyada sheegaya qiimaha hantida, deymaha iyo xisaabaadka.

2. Qodobkan Qodob-hoosaadkiisa__'aad isaga oo sidiisa ahaanaya, waxa baadhitaan lagu samayn doonaa Iskaashatada mar kasta oo Gudida Hawl-wadeenka kala badh in aan ka yarayn ama xubnaha iskaashatada tiro aan ka yarayn 1/3 dalbaan.

3. Hawsha baadhitaanka xisaabta Iskaashatada waxaa fulin doona Hanti-dhawrada Xafiiska Kobcinta Dhisida Iskaashatooyinka ama xubnaha kale ee uu isagu u dirsado.

4. Gudiga Hawl-wadeenka waxaa waajib ku ah inay fududeeyaan qaababka loo baahdo in Iskaashatada Baadhitaan loogu sameeyo.

5. Shirweynaha ayaa loo gudbinayaa warbixinta baadhitaanka xisaabta Iskaashatada, laguna go'aaminayaa.

6. Natiijada Baadhista iyo hubinta Xisaabta iskaashatada waxaa lagu xafidi doonaa Xafiiska Iskaashatada iyo Xafiiska Dhisida iyo Kobcinta Iskaashatooyinka.

QOD 33 AAD Hanaaninta Xisaabaadka

Maalinkasta kharashka iyo dakhliga in si haboon loo diiwaan galiyo raad racyada lagu diyaariyo dhaqdhaqaaqa xisaabaadka maalintaa.

Iyadoo si isdaba jooga bilkasta loo xisaab xidhi waa in la diyaariyo war-bixin xisaabeed muujinaysa guud ahaan qaabka xisaabta ee iskaashatada.

Gudida hawl-wadeenka iyo gudida dabagalka iyagoo qiimaynaya warbixinada xisaabta laga diyaariyay ayuu mid kasta sida ay tahay masuuliyadiisu uu talaabo uga qaadaa.

Qodobka 34'aad: - Jejebinta Macaashka Saafiga ah

Si loo ogaado sannad kasta marka baadhista lagu sameeyo Iskaashatada macaashka la helay:-

j) 1. iskaashatadu faaiidada nadifta ah ee ay ka hesho hawlaha ay qabato 30% waxay uqondayn kayd inta uu raasamaalku kagaadhayo 30% iyaado la dhigayo dhigaalka (saving account)

DDS Wakaalada Dhisida & Kobcinta Iskaashatooyinka

2. 70% ee soo hadhay waxaa lagu qondayn (qaybin) go'aanka shirawaynaha iskaashatada

3. Kaydka Lacagta Iskaashatada ee qodobkan, qodob hoosaadkiisa 1'aad haddii uu cadadka u kaydsani ka badan yahay farqiga waxaa loo isticmaalayaa balaadhinta shaqada.

4. Shaqsiyaadka aan xubin ka ahayn macaashka la helo dhamaan waxaa loo qoondaynayaa sida waafaqsan shaxda qodobkan qodob hoosaadkiisa 1aad

5. Iyada oo marka uu khasaare yimaado laga bixinayo kaydka hadii waxa la hayo uu khasaaraha dabooli waayo waxaa lagu bixinayaa macaashka sannadaha soo socda la helo.

Qodobka 35'aad: - <u>Talaabada Laga Qaadayo Marka ay Dhibaato ku Timaado Hantida iyo Lacagta Iskaashatada</u>

1. Marka baadhista Xisaabta Iskaashatada la samaynayo qofka loo xil saaro fulinta masuuliyada hawsha ama hore ugu xil saaraa ee masuul ah ama shaqaale ah:-

   b) Hadii uu lacag ku bixiyey si ka baxsan nidaamka xeerkan.

   u) Qofka si khiyaamo ah ama foojeri ah isugu daya ama u fuliya inuu lacag ama hantida iskaashatada ku qaado ama waxyeello u geysto, hadii uu shaqaale yahay baadhuhu wuxuu xaalada u gudbinayaa Shirweynaha ama Xafiiska Dhisida iyo Kobcinta Iskaashatooyinka warbixina ka siinayaa.

2. Qodobkan Qodob-hoosaadkiisa 1'aad sida uu qabo la'aanta warbixinta loo gudbiyey qofka arrintu khusayso waxay fursad u siinaysaa ugu badnaan 15 maalmood inuu kaga soo jawaabo.

3. Markaa kedib qofka dhibaatada inuu geystay lagu cadeeyey hadii ay ku cadaato :-

   b) Sida uu qabo qodobka 24'aad ee deyn-bixinta ayey laanta arrinta gacanta ku haysay ay u warsanaysaa marka uu bixiyo.

   u) Balse hadii ay noqoto deyn-qabuhu inuusan diyaar u ahayn laanta gacanta ku haysa waxay maraysaa wadada ugu sahlan ee mudo gaaban go'aan lagu heli karo, waxayna u gudbaysaa odayaal dhexdhexaadiya ama odayaasha garsoorka doodaha si xal looga gaadho.

Qodobka 36'aad: - Heshiis Ku Dhamaynta Khilaafaadka

Khilaafka lagu tilmaamay xeerkan qodobkiisa 39'aad kahor inta aan garsoorka odayaasha loo gudbin waxaa lagu dadaalayaa heshiisiin in lagu xaliyo, waxaana _____ Xubnood oo odayaal heshiis ah wada jir heshiis loogu dooranayaa goob uu joogo eedaysanuhu.

Qodobka 37'aad: - Garsoorka Odayaasha

1. Khilaafaadka lagu tilmaamay Xeerkan Qodobkiisa 39'aad hadii heshiis lagu dhamayn Kari waayo waxaa la dooranayaa 3-oday oo ka garsoora oo sumcad wanaagsan leh. Waxayna arrinta ku xalinayaan garsoor.

2. Odayaasha Garsoorku muranada waxay u dhegaysanayaan talaabo kastana u fulinayaan si waafaqsan sharciga ee nidaamka medeniga ah.

Qodobka 38'aad: - Habka Doorashada Odayaasha Garsoorka

1. Dhinac kasta waxa uu dooranayaa hal oday oo garsoore ah, isla markaana labada dhinacba wadajir ayay u dooranayaan odayga saddexaad oo noqonaya Gudoomiyaha Garsoorayaasha.

2. Gudoomiyaha Garsoorayaasha Labada dhinac hadii ay ku heshiin waayaan, Xafiiska Dhisida & Kobcinta Iskaashatooyinka ayaa laga dooranayaa Gudoomiyaha Garsoorayaasha.

Qodobka 39'aad: - Doodaha Loo Soo Gudbinayo Garsoorka Odayaasha

Arrimaha lagu heshiin waayo ee la xidhiidha fulinta fikirka Iskaashatada, Shaqo-gudashada, IWM:-

1. Muranada laga soo gudbiyo xuquuqda magaca xubnaha geeriyooday ama muranada ka dhex dhasha xubnaha xubnihii hore ama wakiilada xubnihii hore.

2. Muranada ka dhex dhasha Xubnaha, ama Xubnihii hore ama xubnihii hore Wakiiladooda ama dhaxlayaasha xubnaha geeriyooday iyo Gudiga Hawl-

DDS Wakaaladda Dhisida Kobcinta Iskaashatooyinka

wadeenada masuul kasta oo ka mid ah wakiilkiisa iyo shaqaalaha Iskaashatada.

3. Muranada ka dhex dhasha Gudiga Hawl-wadeenada ama iskaashatada ama Masuul kasta oo kamid ah dhamaan Gudiyada Hawl-wadeenada ee hore, wakiil, shaqaale iyo masuul hore iyo shaqaalihiisii hore dhaxlayaashooda ama wakiiladooda ama wakiilada masuuliintii hore ee Iskaashatada ee geeriyooday.

4. Waxa ay awood u leeyihiin inay eegaan muranka ka dhex yimaada Iskaashatada & Dhamaan Iskaashatooyinka kale.

Qodobka 40'aad: - <u>Fulinta Nidaamka Medeniga Awooda ay u leeyihiin Odayaasha Garsoorka</u>

1. Awooda

Sida uu qabo beyaanka Tirsigiisu yahay 985/09 Qodobkiisa 50'aad, Xukun Medeni ah ayay u awood leeyihiin odayaasha Garsoorku, isla markaana arrimaha khuseeya sida lagu tilmaamay qodobka 39'aad ee xeerkan waxay u yeedhan karaan markhaatiyo, waxay dalban karaan cadaymo in loo soo gudbiyo isla markaana tallaabo kasta oo sharciga waafaqsan ayay ka qaadi karaan.

2. Fulinta

Go'aan kasta oo ay bixiyaan odayaasha garsoorku Amar & Xukun beyaanka tirsigiisu yahay 985/09 Qodobkiisa 51'aad sida uu qabo iyada oo loo tixgelinayo in xukun Medeni ah laga gaadhay ayaa markii loo baahdo Maxkamadaha laga hirgelinayaa go'aankii ama amarkii ama Xukunkii.

Qodobka 41'aad: - <u>Habka Racfaanka</u>

Beyaanka Ururada iskaashatooyinka ee 985/09 iyo Qodobka 37'aad ee Xeerkani sida ay qabaan go'aanada garsoorka odayaasha lagu gaadho hadii ay jirto cid aan ku qancin waxay racfaan u qaadan kartaa Maxkamada Sare ee Gobolka.

Qodobka 42'aad: - <u>Hantida Guud Ee aan La Qaybsanin</u>

Inta ay iskaashatadu ka jirto xaalad kasta oo timaada xubnaha looma qaybin karo xisaabta loo qoondeeyeydhigaalka, kobcinta shaqada iyo adeegyada bulshada sida hantida deeqda lagu helay ama lala wareegay ama dhaqdhaqaaqa

Qodobka 43'aad: - Xisaab-sannadeedka Iskaashatada

Mudada ay ka Bilaaban iyo tan ay ku soo xidnmmi doonto hawl sanadeedka iskaashatadu waxay noqon doontaa _____ ilaa _____ waxaana baadhitaan lagu samaynayaa xisaabta iyo dhaqdhaqaaqa sheqada iskaashatada inaysan kala go'in ilaa xiliga ugu danbeeya ee sanad hawleedka

Qod: 44aad:- Burburka Iskaashatada

1. Iskaashatadu waxay ku burburikartaa mid ka mid ah sababahan soo socda, isla markaana heer iskaashatadu ku burburto marka lagaadho mudo todoba (7) maalmood gudahood ah waa in lagu wargaliyo xafiiska dhisida & kobcinta iskaashatooyinka

B. Guud ahaan xubnaha iskaashatada 67% marka u codeeyaan iskaashatadu in ay burburto
T. _____ sanadood sixidhiidh ah marka ay kha saarto
J. hadii ay _____ ka yaraadaan xubnaha iskaashatada
X. Maxkamad awood u leh haddii ay Go'aamiso iskaashataadu inay burburto

2. Qadobka 43aad ee xeerkan isaqoo sidiisa ahaan doona, hadana markasta iskaashatadu inta ay san burburin ka hor

B. waa in la baadho lana sugo xisaabta iskaashatada
T. waana in ugu horaynta la bixiyo Dhamaan daymaha iskaashatada lagu leeyahay, kadib waxa soo hadha xubnaha ayaa loogu qaybinayaa cadad saamiga sida ay ukala la haayeen
J. cida hubinaysa ee baadhaysa xisaabta waxaa laga soo dirayaa xafiiska Dhisida & kobcinta iskaashatooyinka marka la samaynayo hawsha Baadhista iyo sugida xisaabta hadii loo baahdo shirwaynaha waxa laga magacaabayan xubno goob joogayaal ka noqda.